

Qalabka Baarista COVID-19

(COVID-19 Self-Tests)

Qalabka baarista COVID-19 (oo la yiraahdo baarista guriga ama qalabka baarista ee dadku iska soo iibsado) waa nooc ka mid ah baarista COVID-19 oo waa wax fudud oo jawaab looga helo si degdeg ah. Waxaad isticmaali kartaa qalabka baarista ee guriga si aad go'aan uga gaarto yareynta fursadaha aad ku sii faafin karto COVID-19. Waxay ku xiran tahay nooca qalabka baarista ee aad isticmaasho, waxaa kula ogaan kara qof shaqaale ah oo fiidiyow kugula soconaya.

Waxaad isticmaali kartaa qalabka baarista adigoo qaatay ama aan qaadan tallaalka, adiga oo isku arkay calaamado, ama adigoo xanuunka qaba.



Goormaan ka fekeri karaa in aan isticmaalo qalabka baarista?

Waxaad ka fekeri kartaa inaad qalabka baarista isticmaasho haddii aad isku aragto calaamado ah COVID-19, marka lagu qaadsiiyo COVID-19, ama markaad meel aan ahayn bannaan la joogeyso dad aan qoyskaaga ahayn.



Haddii aad isku aragto calaamado oo aad haysato qalabka baarista, isla markiiba isticmaal.



Haddii uu qof ku qaadsiiyo COVID-19, isticmaal qalabka baarista ugu yaraan 5 maalmood ka dib markii lagu qaadsiiyey.



Haddii aad isku baareyso qalabka ka hor intaadan aadin kulan dadweyne, si degdeg ah isaga baar kulanka ka hor ama wakhti ku dhow.

Sidee baan ku heli karaa qalabka baarista?

- Farmashiyaha ama dukaamada ayaad qalabka ka soo iibsan kartaa.
- Qalabka baarista ku soo dalbo internetka [SayYesCovidHomeTest.org](https://www.sayyesCovidHomeTest.org)

Sidee baan u isticmaali karaa qalabka baarista?

Raac tilmaamaha ku dul qoran qalabka ee ah sida saxda ah ee aad saamiga isaga qaadeyso iyo sida aad isu baareyso. Haddii aadan iska qaadin saamiga ama aadan isaga baarin sida saxda ah, jawaab khalad ah ayaa kuu soo baxaysa.



Waa maxay macnaha jawaabta qalabka baarista?



Markaan qalabka baarista ku ogaado in aan xanuunka qabo. Maxaa la iga rabaa in aan sameeyo?

Haddii aad isku aragto calaamado, xiro gafuurxir markaad la joogto dadka kale oo gooni uga bax dadka ugu yaraan 5 maalmood. Waxaad gooni ahaanshaha joojineysaa 5 maalmood ka dib marka aysan qandho ku qaban ilaa 24 saac adigoo aan qaadan daawo qandhada jebisa balse ka soo fiicnaaday calaamadaha. Isticmaal gafuurxir markaad la joogto dadka guriga ama bannaanka, ka dib markay gooni ahaanshaha kuu dhammaato 5 maalmood oo dheeraad ah.

Haddii aad ogaato in aad qabto COVID-19 balse aadan isku arkin calaamadaha, xiro gafuurxir markaad la joogto dadka kale oo gooni uga bax 5 maalmood. Isticmaal gafuurxir markaad la joogto dadka guriga ama bannaanka, ka dib markay gooni ahaanshuhu kuu dhammaato 5 maalmood oo dheeraad ah. Haddii aad isku aragto calaamadaha ka dib adigoo xanuunka qaba, dib u soo bilow wakhtiga gooni ahaashaha.



Markaan qalabka baarista isaga waayo in aan xanuunka qabo. Maxaa la iga rabaa in aan sameeyo?

Haddii lagaa soo helay COVID-19, oo aan dhawaan lagu soo qaadsiin, oo aadan isku arkin calaamadaha COVID-19, waxay u badan tahay in uusan kugu dhicin COVID-19. Uma baahnid baaris kale ama inaad gooni u baxdo.

Haddii lagaa soo helo COVID-19 ka dib adigoo lagu qaadsiiyey balse aan calaamado isku arkino, mar labaad iska soo baar 48 saac ka dib marka hore ee lagaa waayey, dabadeedna 48 saac kadib marka labaad ee lagaa waayo, oo waa saddex baaris.

Haddii lagaa soo helo COVID-19 balse aadan isku arkin calaamado, marka labaad iska soo baar 48 saac ka dib markii hore ee lagaa waayey, oo waa laba baaris.

Haddii lagugula taliyo in aad mar kale isa soo baarto, waa in aad soo marto baarista molekuyuulka, sida baarista PCR, sababtoo ah waa sida lagu helo natiijo sax ah. Haddii xanuunka mar hore lagaaga soo helay baaris ah molekuyuul ama hab kale, isla markiiba dadka ka dhexbax.

Macluumaadyo Dheeraad ah:

Macluumaad dheeraad ah qalabka baarista: www.dhs.wi.gov/covid-19/self-testing.htm

Macluumaadka siyaabaha kale ee baarista: www.dhs.wi.gov/covid-19/testing.htm

Talooyinka la isku gooni yeelo: www.dhs.wi.gov/diagnosed.htm

Waxa xiga marka xanuunka lagu qaadsiiyo: www.dhs.wi.gov/close-contacts.htm

